



## Guddiga oo taageertay qorshaha ballaaran ee casriyeynta Benson

Febraayo 26, Guddiga Waxbarashada PPS ayaa u coddeysay in la ballaariyo qorshaha mashruuca casriyeynta Benson si loogu daro dhammaan barnaamijyada Dariiqooyinka Badan ee loogu diyaar garoobaya Qalin jabinta ‘Multiple Pathways to Graduation’ (MPG) oo hada hoygiisu yahay dhismaha Benson.

Qorshihii hore ee waynaa, waxaa la dejiyay intii u dhaxaysay 2016 iyo 2018-kii, waxaa loo qorsheeyay oo loogu talagalay in uu qaado ardayda dhan 1,700 oo ah ardayda Dugsiga Sare ee Farsamada ee Benson iyada oo aanay ku jirin Qalin jabinta ‘Multiple Pathways to Graduation’. Laakiin degmadu waxay qabatay kulamo dhageysi oo taxane ah, oo lagu falanqaynayo baahiyyaha mid kasta oo ka mid barmaamijyada MPG iyo sahaminta goobo kale oo ku yaala degmada halkaasi oo loo wareejin karo. Iyada oo laga helay kulamadani iyo falanqayntani, waxaa caddaatay in goobta dhexe ee Benson iyo awooda lagu bixinayo waaya-aragnimada barashada oo gacmaha laga qabanayo ay ardayda MPS siinayso fursada ugu wanaagsan ee dhanka guusha.

Isaga oo jira ku Qorshaha Weyn ee Benson ee wax laga beddelay, meel fasal ah oo dheeraad ah ayaa loo qoondeyn doonaa dhismaha Benson dhexdiisa si uu hoy ugu noqdo Machadka Caalamiga ee Dadka Khibrada leh ee Oregon (PISA), Dugsiga Sare ee Pioneer, Aqoonyananada Portland ee Galabta iyo Portland ee Xagaaga, iyo Dadka Khibrada leh ee Portland.

Dhisme gooni ah oo kalidiis taagan oo qiyaastiisu dhan tahay 33,000 ilaa 41,000 square feet, oo laga dhisay hantida Benson, ayaa la isticmaali doonaa si uu hoy ugu noqdo Dugsiga Sare ee Alliance ee ka jira Benson, Xarunta Dib iskugu xirnaanta & Adeegyada, Daryeelka carruurta ee Dhallinyarada Waalidka ah iyo DART/Dugsiga Clinton. Dhismaha cusub waxaa lagu qiyaasay in uu kharashkiisu ku kaco inta u dhaxaysa \$24 malyun ilaa \$36 malyun waxaana la maalgelin doonaa iyada oo lagu darayo Maalgelinta daymeed ee Dugsiga ee 2020.

Si loo xaqiijiyo in mashruuca Benson ugu soo jiro jadwalka loogu talagalay, Guddiga Waxbarashada waxaa la filayaa in ay sanadka 2020 qaado ololaha lacag deyn ah lagu helayo si loo taageero dhammaan wejiyada dhismaha ka socda goobta Benson, mashaariic kale. Tani waxay dheeraad ku noqon doontaa lacagtii ka hortay Maalingelintii 2017-kii ee loo qoondeeyay mashruuca Benson. Haddii maalgelinta daymeed ay gudbin waayaan ama anxisin waayaan cod bixiyayaashu sanadka 2020, mashruuca Benson, ku darida lagu darayo dhismaha la qoondeeyay ee MPG, waxaa la filayaa in lagu dhammeystiro Deyn Qaadashada Credit iyo Is-aaminaada Buuxda ‘Full Faith iyo Credit Bond’.

Inta lagu guda jiro habka casriyeynta saddex sano ah ee bilaabmaya xagaaga 2021, shaqaalahi iyo ardayda Benson, oo ay ku jiraan barmaamijyada Dugsiga Sare ee Pioneer, waxaa si ku meel gaar ah loo dejin doonaa dhismaha Dugsiga Sare ee Marshall. Aqoonyahanada Portland ee Galabta iyo Portland ee Xagaaga iyo PISA waxay ku yaali doonaan Dugsiga Sare ee Grant inta uu socdo dhismaha Benson, iyada oo barnaamijyada kale ee MPG loo wareejin doono Dugsiga Kenton.

Maalgelinta daymeed ee 2017-kii ayaa lagu bixiyay lacagta loogu talagalay casriyeynta dugsiyada sare ee Benson iyo Madion iyo dib u dhiska Dugsiga Sare ee Lincoln iyo Dugsiga Dhexe ee Kellogg. Maalgelinta daymeed sidoo kale waxay bixisay \$150 malyun loo isticmaalayo cusbooneysiinta caafimaadka iyo badbaadada. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan mashruuca Benson, fadlan booqo [website-ka casriyeynta Benson](#).